

November 6, 2024

Natiijoyinka Doorashada Nofeembar 5 ee Dugsiyada Bulshada ee Xarunta Brooklyn

Bulshada BCCS ee Qaaliga ah,

Sida aad ogtihiin, Dugsiyada Bulshada ee Xarunta Brooklyn waxay labo sheey ugu qornaayeen warqadda codbixinta ee deyrta – canshuur rogista mashaariicda raasamaalka ee su'aasha tignoolajiyadda iyo doorashada saddex xubnood oo guddiga doorashada ah. Waa kuwan natiijoyinka doorashada BC ee ay go'aamiyeen dadka deegaanka ee doorashada guud.

- **Canshuur Rogista Mashaariicda Raasamaalka, ee dalbanayso \$700,000 sanadkii oo loogu talagalay kharashaadka la xiriira tignoolajiyadda ayaa la ansixiyay.**
Canshuur soo rogidda waxaa ansixiyay 53.47% (1,501 oo cod) ilaa 46.53% (1,306 oo cod).
- **Codbixiyayaashu waxay doorteen Amy Bailey, Ruthie Dallas, iyo Mary O'Connor muddo xileed afar sano ah oo ay ahaanayaan guddiga dugsiya. Muddo xileedkooda wuxuu bilaabanayaa Janaayo 2025.**

[Guji halkan si aad u daawato fariin muuqaal ah oo ku saasan natiijoyinka doorashadeena.](#)

Waxaan rabaa in aan bulshadeena si weyn uga mahadceliyo ansixinta aftidan. Waad ku mahadsan tihiin garab istaaga ardaydeena. Lacagta laga helo canshuur rogista ayaa wax weyn ka tari doonta shaqadeena ardayda lagu awoodsiinayo xirfadaha ku habboon mustaqbalka, waxay taageeri doonaan safarka waxbarasho ee gaarka ah ee arday kasta, waxayna deegaanka waxbarasho u horumarin doonaan inuu noqdo bulsho dugsi oo badbaadsan, oo aad isugu xiran.

Waxaan sidoo kale rabaa in aan fursadan uga faa'iideysto in aan uga mahadnaqo dhammaan kuwi kaqeybqaatay ololeheena xogsiinta ee sanadkan, anigoo si gaar ah ugu mahadcelinayo shaqaalaha iyo xubnaha bulshada ee waqtigooda gaarka ah ku bixiyay in Haa loogu Codeeyo Guddiga BCCS. Shaqadiina in aad sheekadeena la wadaagtaan bulshadeena waxay ahayd mid aad u qiimo badan waxayna xusuusin wayn u tahay in aan NAHAY bulsho muujisa xamaasad, sharaf, iyo dulqaad maalin kasta.

Waxaan wax wanaagsan hortoda u rajeyneynaa Dugsiyada Bulshada ee Xarunta Brooklyn!

Salaan wacan,

Dr. Carly Baker, Kormeeraha Guud

Natiijada codbixinta ee kama dambeysta ah ee doorashadan waa mid aan rasmi ahayn ilaa Guddiga Dugsiya Madaxa-bannaan ee Degmada Lr. 286 (Xarunta Brooklyn), Minnesota ay natiijada rasmiga ee doorashada ku hubiyaan kulanka ganacsi ee soo socda Talaado, Nofeembar 12, 2024. [Guji halkan si aad u eegto dhammaan natiijoyinka doorashada guud.](#)